

LIISKA INAAD XASUUSTO NADAAFADA U DANBEYSA

Waa waajib saaran macmiilka nadiifinta marka uu ka guurayo hoyga si foojigan.
 Waa inaad hubisaa inta Aadabn guurin inaad si wanaagsan Aad u nadiifisey waana
 sida hoos ku qoran qaabka nadaafada u danbeysa loo sameynayo.


Ogsoonow, in !

- Haddii aad nadaafada u danbeysa u sameyn sida lagu farey ama aadanba nadiifin
 ama aad qeyb ka takto, waxaan kuusoo direynaa kharashka ku baxa shaqada xirfadlaha
 nadaafada sameeyey gebi ahaanteeda;
- Haddaad alaab kaga takto hoyga, waa la tuurayaa kharashka faaruqinta hoygana
 adigaa lagugu soo dalacaya.


Jikada

- Masax dhamaan meelaha wax la saaro dushooda iyo weliba qalabka ka nadiifi dufanka
 iyo waxa ku dhagan, sidoo kalena gudahana ka nadiifi.
- Nadiifi makiinada wax lagu karsado, foornada iyo biraha foornada, sidoo kale xasuuso
 dhinacyada inaad ka nadiifiso.
- Nadiifi marwaxada hawada ee makiinada dusheeda.
- Dhaq talaajada/fintijeerka oo dhalaali qaboojisadana.
 Ka huufaree habaaska/boorka talaajada gadaasheeda.
- Haddii hoygaaga SATO yaaley qasaalada maacuunta, u nadiifi si taxadar leh.

Nadiifinta hawo-saaraha makiinada cuntada lagu karsado



Dhalaalinta iyo nadiifinta talaagada iyo qaboojiyaha




U foojignow dhalaalinta qaboojisada qalajina barafka dhalaaley markiiba, si uusan dhulka u qoyn Ka bixi bareyska kadibna albaabka talaagada balaq.

Qaboojisada aan la dhalaalin, waxay keeni kartaa fatahaad ama waxyeelo qoyaan, haddaan qof markaas soo dageyn. markiiba heshiiska korontadana ka bax.

Suuliga, musqusha qubeyska iyo sawnada

- Dhaq fadhiga suuliga, tubooyinka iyo saxanka weji dhaqa.
- Dhaq musqusha qubeyska iyo waaskada.
- Dhaq sawnada, xasuuso sidoo kale albaabka sawnada.
- Nadiifi dhulka iyo bulaacdada.

Nadiifinta bulaacadaha dhulka



Derbiga iyo dhulka

- Huufaree dhulka, istiraasho yar ku masax derbiyada oo kaga tir wixii ku dhagan.
- Ka nadiifi derbiyada waxa ku yaala iyo hadey sharootooyin ku dhagan yihiin.
- Nadiifi kanaalada hawada ay ka baxdo.
- Tirtir damiye daaraaha nalka.
- Tirtir muraayadaha agabka dhalooyinka.


Daaqadaha iyo albaabaadka

- Nadiifi muraayada daaqadaha iyo balakoonka. Nadiifi shabaqa daaqada ku xiran ka hor intaanad nafiidin muraayada daaqadaha.
- Nadiifi albaabaadka iyo gaanjooyinkooda.

Goobaha kale

- Faaruqi oo nadiifi qolka dharka iyo armaajoojinkaba.
- Hagaaji oo faaruqi balakoonka iyo baqaarka alaabta.

Nadiifinta filteraha hawo-bedelaha



Faaruuqinta guriga

